

# FAAFINTA RASMIGA AH

الجريدة



الرسمية

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

Sannadka 15aad, Muqdisho, 28ka Disembar 1987, L. 2 R 12

FAAFIN BIL SOO BAXA

جريدة شهرية

**QIIMADU:** waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA:** Sanaadii waa Sh. 100 Soomaaliya gudeheeda - dibaddedana waa Shs. 300. Rubunka la weydiisto waqtiga loo gooyey waxuu ka bilabmaa 1 Janaayo. Qiimaha qoritaanku F. R. halkii

sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faaifinta Rasmiga ah. Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta.

## K O O B N I I N

QAYBTA

KOWAAD

SHARCI

W. M.

QAYBTA

LABAAD

X E E R

**XEER-SHARCI** L. 3 ee 8 Dis. 1987, wax ka be-  
delidda Tariifada Sharci L. 1,2,3 Ordinance  
22 1.1955.

Bog; 988

**XEER MADAXWEYNAHA** J.D.S. L. 50 ee 5  
Dis. 1937, Magacaabid Nootaayo

**DECREE** No. 51 on 28 Sept. 1987, Instrument  
of ratification.

» 995

**XEER MADAXWEYNAHA** J.D.S. L. 52 ee 25  
Luulyo 1987, Magacaabid X. Cabdi Warfaa  
G/ha Golaha Sh/ga D/ka Deg. Kismaayo.

» 996

Wakaajadda Madbacaajda Qaranka

QAYBTA SADDEXAAD

TALOOPYIN ISGAARSIIN OGE. IYO WIXII LA MID AH

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 8.12.87, Naado Dhul J.le Afro Gufttrading L. 425	»	999
WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 8.12.87, Dhul J.le Xaawo Cabdi Dhjblaawe L. 426	»	1000
WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 8.12.87, Dhul J.le Cali Sheekh Abuukar L. 427	»	1001
MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 8.12.87, Lumid J/War. ku qoran Jaamac Axmed Maxamed L. 425	»	1002
MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 12.12.87, Lumid J/War. L. 0194111 ku qoran Cismaan Cawaale Fiidow L. 426	»	1003
MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 12.12.87, Lumid J/War. L. 0364437 ku qoran Maryan Daqaj Xuseen L. 427	»	1004
MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 14.11.87, Lumid B/Keyd L. 14241 ku qo ran Xaawo Maxamed Axmed L. 428	»	1005
MAXKAMADDA G. TOGDHEER, 5.12.87, Lu mid Jeeg War. L. 0029138 ku qoran Cabdi Cawaale Cali L. 432	»	1006
MAXKAMADDA GOB. BANAADIR, 15.12.87 Lumid J/War. L. 01456 0 ku qoran Faa duma Cali Mursai L. 433	»	1007

S A X I D — Q A L A D

FAAFINTA RASMIGA AH EE L. 1 r 7 ee 23 Luulyo 1987,  
Bog. 451, ku qoran Go'aanka Maxkamadda Gobolka  
Banaadir, kuna soo baxday magac qalad ah waa in loo  
akhriyaa sida hoos ku qoran:-  
Jaalje Aadan Ciise Xasan .

XEER-SHARCI L. 3 ee 8 Dis. 1987, wax ka bedelida Tariifada UJEEDDO: Sharci Lam. 1,2,3 Ordinaance 22.1.1955.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

ISAGOO ARKAY: Qodobka 69aad ee Dastuurka J.D.S.

ISAGOO ARKAY: Xeerka Ikhtiraacyada, Naqshadaha Warshadeedka iyo Sumadaha Ganacsiga Lam. 1,2&3 ee soo baxay 22.1.1955.

ISAGOO ARKAY: Sharciga Lam. 33 ee 18.1.1975 kuna saabsan dhaqan gelinta Gobolada Waqooyi.

ISAGOO GAROWSADAY: In loo baahanyahay wax ka bedelida lid iyo dib u habeynta Tariifada Ikhtiraacayada (Patent) Naqshad Warshadeedka (Industrii Disegn) iyo Sumadaha Ganacsiga (Trade Marks) kuna qoran Lifaacyada la socda Xeer Lam. 1,2, & 3 ee 22.1.1955.

IYADOO AAY SOO JEDIYEEN: Wasiirada Warshadaha Lacagta.

ISAGOO DHAGEYSTAY: Golaha Wasiirada.

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeer Sharcigan:

Qodobka 1aad

Waxaa wax laga beddelay Tariifooyinka ku xusan xeerka Lam. yahay 1,2,&3 ee soo baxay 22.1.1955. Waxaana lagu bedelay Tariifooyinka halka kan ku lifaaqan.

Qodobka 2aad

1— Waxaa la bedelay shaxda (Tabella) B&T ee ku lifaaqan Xeerka 1aad ee 22.1.1955, kuna saabsan Ikhtiraacyada, Waxaana lagu bedelay shaxda B & T ee ku lifaaqan halkaan

2— Sidoo kale waxaa la bedelay shaxda B & T ee ku lifaaqan Xeerka 2aad ee 22.1.1955, kuna saabsan Naqshad Warshadeedka, waxaana lagu bedelay shaxda B & T ee ku lifaaqan halkaan.

3— Waxaa la bedelay shaxda B & T ee ku lifaaqan Xeerka 3aad ee 22.1.1955, kuna saabsan Sumadaha Ganacsiga, Waxaana lagu bedelay shaxda B & T ee ku lifaaqan halkaan

### Qodobka 3aad

Ajuuradda ku saabsan Ikhtiraacyada, Naqshad Warshad eedka & Sumadaha Ganacsiga ee ka timaada dibada waxaa lagu bixinayaa lacag ah US dollar ah ama lacag adag ee u dhiganta ee Bangiga Dhexe ee Soomaaliyeed uu Aqoonsanya hay.

Haddii qof ama shirkad Soomaali ah oo Dalka gudahiisa degan soo codsado, waxaa ajuurada lagu bixinayaa shilin Soomaali, iyadoo la raacayo sida ku cad Tariifooyinka Xeer kan ku lifaaqan.

### Qodobka 4aad

1— Mudada ilaalinta Naqshada Warshadeedka waa 7 Sano marka laga bijaabo Taariikhda la diiwaan geliyo arjiga Xaqsiinta ee Xafiisku aqoonsado.

2— Mudada ilaalinta sumadaha Ganacsiga waa 10 Sano marka laga bijaabo Taariikhda la diiwaan geliyo ee Xafiisku na aqoonsado.

### Qodobka 5aad

Xeer Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa markii uu soo saxiixo Madaxweynaha J.D.S. Waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Iyadoo ja horgeynayo Golaha Shacbiga si sharci loogu rogo.

Muqdisho, 8 Dec. 1987.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

Maxamed Siyaad Barre

BIXINTA CANSHUURTA IKHTIRAACYADA

FAAH FAAHINTA	SHAXDA (TABELLA) B	
	SH.SO.	USD.
1. Arjiga Weydiinta Ikhtiraaca aasaasiga ah	4.600	50
2. Wakaaladda (Lettere Dincarice)		
3. Dhaqan gelinta Ikhtiraacyada		
a) Sanadka 1aad	2.760	30
b) Sanadka 2aad	3.680	40
c) Sanadka 3aad	4.600	50
d) Sanadka 4aad	4.600	50
e) Sanadka 5aad	6.440	70
f) Sanadka 6aad	7.360	80
g) Sanadka 7aad	8.280	90
h) Sanadka 8aad	9.200	100
i) Sanadka 9aad	10.120	110
j) Sanadka 10aad	11.040	120
k) Sanadka 11aad	11.960	130
l) Sanadka 12aad	12.880	140
m) Sanadka 13aad	13.800	150
n) Sanadka 14aad	14.720	160
o) Sanadka 15aad	15.640	170
4. La daahidda Sanadeedka		
A) 3da bilood ee hore	920	10
B) 3da bilood ee xigta	920	10
5. Rafcaan u qaadashada guddiga	1.840	20
6. Bixinta warqadda shahaadada	1.840	25
7. Sugitaanka Nuqulka iyo tilmaan sawirka	920	10
8. Diiwaan aragtida	920	10
9. Caddeynta Nuqulka Wardadda asalka ah, Ikhtiraacida	920	10

XAQSIINTA IKHTIRAACA  
BREVETTO D'INVENSIONE

Dokumentiga la doonayo in lagu soo qoro warqadda ra's miga ah (cartobulleta) ee qiimaheedu yahay sh.so 50

1. Arjiga laad ee Xaqsiinta.
2. Arjiga dhammeystirka xaqsiinta.
3. Arjiga la doonayo in lagu helo.
  - a) Dib u dhigidda arjiga da'weynaha.

- b) Diinwaangejinta dokumenti wax gudbiya ama dam aanad oggolaada.
- c) Cadeyn.
- d) Nuqul ka qaadasho diiwaan.
- e) Sugitaanka nuqul faah faahin ama calaamo.
- f) Bixin nuqul soocelid ah ee salka xaq siinta.
4. Faah Faahinta ku lifaaqan arjiga xaqsiinta ee Ikhtiraaca Sanadeedka, aasaasiga ama dhameystirka.
5. Calaamo ku lifaaqan xaqsiinta aasaasiga ama dhameys tirka.
6. Xaqsiinta Ikhtiraaca Sanadeedka aasaasiga ama dhismo
7. Rafcaan u qaadashada guddiga racfaanka.  
Cadeyn.
9. Nuqul ka qaadasho diiwaan.
10. Sugitaanka nuqul faah faahin iyo calaamo.
11. Bixin nuqli saayid ah ee salka xaqsiinta.

TABEELO «B»  
MUGGA KU INTIFAACIDDA

	SH.SO.	USD
1. Arjiga weydiinta	2.760	30
2. Bixinta Canshuurta ja bixnaayo hal mar	5.520	60
3. Bixinta Canshuurta lagu bixiyo 2 hafta		
A) Hafta 3 Sano Hore	3.680	40
B) Hafta 4 Sano Dambe	4.600	50
Nuuca iyo calaamad bixinta		
4. Arjiga weydiinta	2.760	30
5. Bixinta Canshuurta lagu bixiyo hal Hafto	2.760	30
6. Bixinta Canshuurta lagu bixiyo 2 qeyb:		
A) Hafta Hore	2.760	30
B) Hafta Dambe	3.680	40
Bixinta Xaqsiinta Isku Dhafan		
7. Haddii Canshuurta lagu bixiyo hal mar	5.520	60
Haddii Canshuurta lagu bixiyo labo qeyb:		
A) Hafta hore	3.680	30
B) Hafta dambe	4.600	50
Xaqsiinta nooca intifaaca iyo calaamadda qurxinta		

8.	Warqadda wakaalada	1,840	20
9.	La daanida bixinta nafqa zaad ku dhiman		
	3da bilood ee hore	2,760	30
	1na ka dhiman 3da bilood ee dambe	2,700	30
10.	Dip u dhigida araga qadweynaha	1,840	20
11.	Rafcaan u qaadashada guddiga rafcaanka	1,840	20
12.	Diiwaan gelinta arjiga w/jinta ama rahmida	1,840	20
13.	Bixinta warqadda shanaadada	1,840	20
14.	Nuqul bixinta	920	10
15.	Sugitaanka Nuqliga	920	10
16.	Bixinta Nuqul asalka	920	10

(Rate of exchange 192 sh.so. according 1986

### HABKA LOOGU NAFCIYAYO

Dokumentoyiqaan la doonayo in lagu soo qoro warqad da rasmiga (Carta bolleto) ee qumaneeu yahay (oo) sh. warqaddaha.

1. Arjiga xaqiinta.
2. Arjiga lagu weydiihayo.
  - a) Dip u dhigida qadweynaha.
  - b) Diiwaan gelinta warqadda guddiga ama rahmida
  - c) Caddeyn.
  - d) Nuqulka qaadashada diiwaanka.
  - e) Sugitaanka nuqliga faah faahinta.
  - f) Nuqliga asalka ee mar labaad la bixiyo (Duplicate).
3. Faah faahin lagu lifaaqay arjiga xaqiinta habka lagu nafciyo.
4. Astaan lagu lifaaqay arjiga xaqiinta habka lagu nafciyo astaanta qurxeynta, asalka iyo IWM.
5. Xaqiinta habka lagu nafciyayo, astaanta qurxinta, asalka iyo dhowritaanka.
6. Rafcaan u qaadashada guddiga rafcaanka.
7. Caddeyn.
8. Nuqul u qaadashada diiwaanka.
9. Sugitaanka nuqliga faah faahinta iyo astaamo.
10. Asalka mar 2aad la bixiyo (Duplicate) oo xaqiinta.

### BIXINTA CANSHUURTA SUMADAHA GANACSIGA

«B» Sumada Ganacsiga.

Shaxda (Tabeel) T. «B»

SH.SO. USD

- |    |  |       |    |
|----|--|-------|----|
| 1. | Arjiga laad ee Sumadda   | 2,760 | 30 |
| 2. | Bixinta sumada 2aad ama cusbooneysiinta ku saabsan wax isku ceyn ah oo hal kajaas ah, haddii canshuurta mar qura la bixiyo   | 6,440 | 70 |
| 3. | Bixinta sumada 2aad ama cusbooneysiinta sumadda ku saabsan wax isku ceyn ah oo hal kajaas ah haddii canshuurta lagu bixiyo «2» qeybood   | 1,840 | 20 |
|    | A) Qeybta shanta sano ee hore.   |       |    |
|    | B) Qeybta shanta sano ee dambe:  |       |    |
| 4. | Bixinta sumadda laad ama cusbooneysiinta sumadda ku saabsan noocyada kala geddisan lehna hal kajaas ka badan, ka dib marka lagu kordhiyo canshuurta ku sugan Lambarka 2aad ee kajaas walba midda hore waxaa u dheer haddii canshuurta mar qura la wada bixiyo 920 10 |       |    |
| 5. | Bixinta sumada laad ama cusbooneysiinta sumadda ku saabsan noocyo lehna hal kajaas ka badan kalana geddisan kedib markii lagu kor dhiyo canshuurta lambarka 3aad ku xusan kalaas walba waxaa u dheer haddii canshuurta labo qeybood lagu bixiyo:                     |       |    |
|    | A) Qeybta snanta sano ee hore  | 1,840 | 20 |
|    | B) Qeybta shanta sano ee dambe   | 1,104 | 12 |
|    | T) SUMADDA GANACSIGA EE WADARTA  |       |    |
| 6. | Arjiga sumad keenista hore   | 2,760 | 30 |
| 7. | Bixinta shahaadada sumada laad ama hal ka badan haddii canshuurta mar qura la bixiyo   | 2,760 | 30 |
| 8. | Bixinta shahaadada sumadda laad ama cusbooneysiinta ku saabsan kalaas ama ka badan haddii canshuurta lagu bixiyo labo qeybood:   |       |    |
|    | A) Qeybta  | 2,760 | 30 |
|    | B) Qeybta Dambe  | 2,760 | 30 |

Rate of exchange 1/92 Sh,So.

«J» SUMADDA GANACSIGA AMA WADARTA:

- |     |   | SH,SO | USD |
|-----|---|-------|-----|
| 9.  | Warqadda Wakaaladda   | 368   | 4   |
| 10. | La dahaahidda cusbooneysiinta sumadda & bixinta canshuurta ha noqoto mid mar la wada bixiyo ama mid laba qeybood la bixiyo kuna saabsan keenista hore ama |       |     |



a) Inta ku siman 3da bilood ee hore	2.760	30
b) Inta ku siman 3da bilood ee dambe	3.680	40
11. Rafcaan u qaadashada guddiga rafcaanka	3.680	40
12. Diiwaan gelinta warqadda wareejinta	2.760	30
13. Bixinta warqadda shaadada	920	10
14. Diiwaan aragtida	920	10
15. Sugidda nuqulka sumadda	920	10
16. Bixinta nuqulka lagu sameeyo asalka	920	10

XAQSIINTA KU DHAQANKA SUMADDA

Tabela «T»

Dokumentoyinka la donayo in lagu qorto warqadda asaasiga ah (cartabuljeto) qiimaheedu yahay sh.so. 50

1. Arjiga xiqsiinta.
2. Arjiga lagu weydiinayo.
  - a) Diinwaangelinta dokumenti wax gudbisa.
  - b) Caddeyn.
  - c) Nuqulka qaadashada diiwaanka.
  - d) Sugitaanka nuqliga sumadda, faah faahinta cadeynta xaq ilaalinta.
  - e) Asalka mar 2aad la bixiyo (duplicate).
3. Faah faahinta lagu lifaaqayo arjiga xaqsiiinta.
4. Cadeyn xaq ilaalin lagu lifaaqayo arjiga xaq siinta.
5. Xaqsiiinta sumadda.
6. Rafcaan u qaadashada guddiga rafcaanka.
7. Caddeyn.
8. Nuqulka qaadashada guddiga rafcaanka.
9. Sugitaanka nuqliga sumada, faah faahinta iyo cadeyn ilaalinta.
10. Asal xaqsiiinta ee mar 2aad la bixiyo.

QAYBTA

LABAAD

X E E R

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 50 ee 5 Djs. 1987 Magacaabid Nootaayo.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY: Dastuurka JDS, Qodobkiisa 82aad;

ISAGOO ARKAY: Sharcii Ir 8 ee 15.2.61 iyo Ir. 1 ee 2.3.62 oo ku wada saabsan habeynta hawlaha Nootaayada;

ISAGOO ARKAY: Sharciga Ir, 7 ee 2.2.86 oo ku saabsan Mihnadda Nootaayada;

ISAGOO TIXGELINAYA: Talada uu soo jeediyey Wasaarada Garsoorka iyo A.D.

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda:

Qod. 1aad

Iyadoo la tixgejinayo Qodobka 2aad ee Sharciga Ir. 7 ee soo baxay 2.2.1986 laga bilaabo taariikhda uu dhaqan galay Xeerkan Jaallaha magaciisa hoos ku qoran waxaa lagu magacaabayaa Nootaayo: (Jaalle Ibraahim Jaamac Jibriil) G/Sanaag Ceerigaabo.

Qod. 2aad

Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa markuu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda.

Muqdisho, 5.12.1987

MADAXWEYNAHA J.D.S  
(Jaalle Maxamed Siyaad Barre)

DECREE No. 51 of 28 Sep. 1987: Instrument of ratification.

**THE PRESIDENT**

**HAVING SEEN:** the Article 67, para 5 and the Article 82, para 4 of the Constitution of the Somali Democratic Republic;

**HAVING SEEN:** the Law No. 49 of 23 December 1984;

**HAVING SEEN:** the Law No. — of 28 Sep. 1987 on the base of which the People's Assembly has approved the Agreement specified in this Decree;

**HAVING CONSIDERED:** the necessity to ratify this Agreement;

**HEREBY PROMULGATES**

the following Decree:

**Article 1**

The Development Credit Agreement (semi-mechanized Rainfed Agriculture Pilot Project) between Somali Democratic Republic and International Development Association, signed in the District of Columbia (USA) on April 13, 1987, is hereby ratified.

**Article 2**

This Agreement shall have a force of Law in the Territory of Somali Democratic Republic.

**Article 3**

This Decree shall come into upon signature by the President of Somali Democratic Republic and shall published in Official Bulletin of the State.-

Mogadishu, 28 Sep. 1987

**THE PRESIDENT OF SDR**  
( Mohamed Sjad Barre )

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 52 ee 25 Luulyo 1987,  
Magacaabid Xaaji Cabdi Warfaa G/na Golaha Sh/ga  
D/ka Degmada Kismaayo.

#### MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY: Qod. 82/14 iyo Qod. 94 ee Dastuurka  
J.D.S;

ISAGOO ARKAY: Warqad Ir XHKS/GJH/GK/GDH/-  
6/87 ee 26.5.87 ee Guddigii Kormeerka G/Dhexe XHKS;

ISAGOO ARKAY: Qod. 41aad ee Sharciga Jr. 6 ee 12.2.80  
ee sharciga Golayaasha Shacbiga ee Degaanka;

ISAGOO HELAY: Talada Wasiirka Arrimaha Gudaha  
ee dhegeystay Guddoomiyaha Maamulka Gobolka J/Hoose.

#### WUXUU GUDDOONSHEY

Qod. 1aad

In Jaalle, Sheekh Maxamuud Ibraahim oo ah Guddoo-  
mijaha Golaha Shacbiga Degaanka D/Kismaayo laga qaaqo  
xilka, isla markaana laga saaro xubinimada Golaha Shacbi-  
ga Degaanka Degmada Kismaayo, isagoo ku siioobay kaja  
qeybinta Bulshada, Hoggaamin xumc, karsj darto iyo u  
adeegid la'aanta Bulshada.

Qod. 2aad

Waxaa loo magacaabay Jaalle, Xaaji Cabdi Warfaa Ax-  
med Guddoomiyaha Golaha Shacbiga Degaanka Degmada  
Kismaayo, isagoo buuxinaya jagadii laga qaaday Guddoo-  
mijihii hore Golaha Shacbiga Degaanka Jaalle, Sheekh Ma-  
xamuud Ibraahim.

Qod. 3aad

Jaalle, Cabdi Khaajiif Sheekh Cabdikariin oo ah Xubin-  
sugaha koowaad wuxuu buuxinayaa jagadii ka banaaneyd  
Golaha Shacbiga Degaanka Degmada Kismaayo.

Qod. 4aad

Xeerkani wuxuu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Ma.  
daxweynaha JDS. Waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Ras.  
miga ah ee Dawladda.

Waan aragnay ee diiwaangelinay

Diiwaanka Jr. 1 bogga lr. 50

Taariikh 2 Aug. 1987

Saxiixa

Hantjdhowraha Guud ee Dawladda

Jaalle XUSEEN CABDULLE CALI

Muqdisho, 25 Jul. 1987

MADAXWEYNAHA J.D.S  
(Jaalle Maxamed Siyaad Barre)

**QAYBTA**

**SADDEGAAD**

**TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IYO W.M,  
WASAARADDA HAWLAHA GUDD IYO GURIYEYNTA  
GOBOLKA SH/HOOS SHALAMBOOD**

**N A A D O D H U L**

Waxaa la caddeynayaa in SHIRKADDA AFRO GULF-TRADING uu ku soo weydiistay arjiga taariikhdiisu ahayd 16.10.1987; gabal Dhul Dawjadeed ah oo ku yaala Deg. Af. gooye Qaabkiisuna yahay Rettangolare; Addimihisuna yihiin: m.140; m.140; m.160; m.160 = Mq. 22400;

**SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN**

- 1— Waqooyi waxaa ka xiga: Waddada Xamar/Afgooye
- 2— Koofur waxaa ka xiga: Dhul uu leeyahay Cabdisalaam
- 3— B a r i waxaa ka xiga: Jaamacadda Lafaole
- 4— Gaabeed waxaa ka xiga: Dhul uu leeyahay Xasan Buurey.

Qofkii doonaayo dhulkaa wuxuu si fiiican uga arkijaa. raa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda dhulka iyo Dhismaha ee Wasaaradda Hawlaha Guud Gob/Sh/Hoose waxaana laga doodikaraa muddo ku siman 30 (Soddon) maalmood laga bilaabay maalinta lagu soo daabaco Buugga Faafinta Rasmiga ah; laguna soo dhejiyo looxa Ogeysiisyada ee D/Hoose waaxda Farsamada Dhulka.

Marka, 8.12.1987

**AGAASIMAHA WHG/GOB/SH/H.  
(Saciid Xirsi Nuux)**

WASAARADDA HAWLAHA GUDD IYO GURIYEYNTA

GOBOLKA SH/HOOSE SHALAMBOOD

N A A D O D H U L

Waxaa la caddeynayaa in J.le Cali Sheekh Abuukar uu ku soo weydiistay arji taariikhdiisu ahayd 12.5.1985; gaba dhul Dawladeed ah oo ku yaal Degmada Afgooye; Qaabkiisu na yahay:- Rettangolare Addjimihiisuna yihiin:- m.165;- m.70; m.155; m.53; m.21; m.25,80; m.50; m.70; m.70 = Mq.- 26407,50.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

- 1— Waqooyi waxaa ka xiga: Waddada Xamar/Afgooye
- 2— Koofur waxaa ka xiga: Dhul Banaan
- 3— Galbeed waxaa ka xiga: Xaawo Cabdi Dhiblaawe
- 4— B a r i waxaa ka xiga: Dhul Banaan

Qofkii doonaayo dhulkaa wuxuu si fiiican uga arkjka. raa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda dhulka iyo Dhjisma. ha ee Wasaaradda Hawlaha Guud Gob/Sh/Hoose waxaana laga doodikaraa muddo ku siman 30 (Soddon) maalmood laga bilaabayo maalinta lagu soo daabaco Buugga Faafinta Rasmiga ah; laguna soo dhejiyo looxa Ogeysiisyada ee D/Hoose waaxda Farsamada Dhulka.

Marka, 8.12.1987

AGAASIMAHA WHG/GOB/SH/H.  
(Saciid Xirsi Nuux)

L. 427

WASAARADDA HAWLAHA GUDD IYO GURIYEYNTA  
GOBOLKA SH/HOOSE SHALAMBOOD  
N A A D O D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jje Xaawo Cabdi Dhjbiaawe ay soo weydiisatay arjiga taariikndisu ahayd 12.5.1985; gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaaq Deg. Afgooye Xaafadda Sh. Axmed Xaaji, Qaabkiisu yahay POLIGONO IRREGOLARE Addimjiniisuna yihiin:- m.165;137;21;50;25;80;84;105,-70;70 = Mq. 26407,50,

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

- 1— Waqooyi waxaa ka xiga: Waddada Xamar/Afgooye
- 2— Koofur waxaa ka xiga: Dhul Banaan
- 3— Galbeed waxaa ka xiga: Dhul Banaan
- 4— B a r i waxaa ka xiga: Cali Sheekh Abuukar

Qofkii doonaayo dhulkaa wuxuu si fiiican uga arkijaa. raa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda dhulka iyo Dhjmaaha ee Wasaaradda Hawlaha Guud Gob/Sh/Hoose waxaana laga doodikaraa muddo ku siman 30 (Soddon) maalmood laga bijaabay maalinta lagu soo daabaco Buugga Faafinta Rasmiga ah; laguna soo dhejyo looxa Ogeysiisyada ee D/Hoose waaxda Farsamada Dhulka.

Marka, 8.12.1987

AGAASIMAHA WHG/GOB/SH/H,  
(Saciid Xirsi Nuux)



MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J/le Jamaal Axmed Maxamed

HADDUU TIXGELIYEEY: In ay dhumeen Jeegaga Lambar 0960076, 0960105, ee laga sameeyay Laanta B/Weyne ee Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed kuna qoran magaca Jamaal Axmed Maxamed lacagta ku jirta ay tahay 3.000.000 (Sadex Milyan) sida ku cad warqaadda Lam. 20649 Tr. 5.11.87 Bankiga Ganacsiga iyo kaydka Soomaaliyeed Qaybta Xis. Guud.

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga Lam. 2 ee Tr. 9.9.1962

WUXUU XEERIYEEY

In la baabi'yo (Ammortamento) Jeegaga War. ee dhumay Lam. 0960076.0960105, ee laga sameeyay L. B/Weyne ee Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed kuna jirto Lacag dhan sh.so. 3.000.000 (Sadex Milyan) kuna qoran magaca Jamaal Axmed Maxamed.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta B/Weyne ee Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed in ay siiso J/le Jamaal Axmed Maxamed lacagta cadaadkeedu yahay 3.000.000 (Sadex Milyan) oo ah bedelkii Jeegaga War. ee dhumay korna ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yareen 15 maalmood laga bilaabo maalin go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 8.12.87.

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. BANAADIR

Dr. Cabdullaahi Axmed Xaash

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J/le Cismaan Cawaale Fiidow.

HADDUU TIXGELIYEEY: In uu lumay J/War. Lr. 0194111 kuna jirto lacag dhan sh.so. 50.000 kuna qoran magaca J/le Yuusuf Axmed Xasan sida ku cad warqadda lam.

20910 Tr. 10.12.87 iyo keydka Soomaaliyeed L. Q. X. G.

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga Lam. 2 ee Tr. 9.9.1962

WUXUU XEERIYEEY

In la baabi'yo (Ammortamento) J/War. Lam. 0194111 Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed L/Q/X/Guud kuna jirto lacag dhan sh.so. 50.000 kuna qoran magaca Jaale Yuusuf Axmed Xasan.

WAXAA LA AMRAYAA

Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed Laanta Marka in ay siiso J/le Cismaan Cawaale Fiidow lacagta caddeyntu tahay sh.so. 50.000 oo ah beddelkii J/War. kor ku qoran markay ka soo wareegto muddo aan ka yareen 15 maalmood laga bijaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa wax is hortaag ah aan laga keeji.

Muqdisho, 12.12.87.

GARSOORAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

Dr. Cabdullaahi Axmed Xaash

**MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR**

**HADDUU ARKAY:** Arjiga uu soo qortay J/le Maryan Daqal Xuseen.

**HADDUU TIXGELIYEY:** In uu lumay J/War. Lambar 0364437 kuna jirto lacag dhan sh.so. 50,000 kuna qoran magaca J/le Xasan Iimaan Warsame sida ku cad warqadda lam. yahay 19589 Tr. 12.11.87 iyo keydka Soomaaliyeed Laanta Qeybta Xis. Guud.

**HADDUU ARKAY:** Qod. 69 sharciga Lam. 2 ee Tr. 9.9.1962

**WUXUU XEERIYEY**

In la baabi'yo (Ammortamento) J/War. Lam. 0364437 Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed L/Q/X/Guud kuna jirto lacag dhan sh.so. 50,000 kuna qoran magaca J/le Xasan Iimaan Warsame.

**WAXAA LA AMRAYAA**

Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed Laanta Hargeysa 2aad in ay siiso J/le Maryan Daqal Xuseen lacag ta caddeyntu tahay sh.so. 50,000 oo ah beddelkii J/War. kar ku qoran markay ka soo wareegto muddo aan ka yareen 15 maalmood laga bijaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faaqinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa wax is hortaag ah aan laga keenin.

Muqdisho, 12.11.87.

**GARSOORAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR**

Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashij

**MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR**

**HADDUU ARKAY:** Arijiga uu soo qortay Jaalle Xaawo Maxamed Axmed.

**HADDUU TIXGELIYEY:** In uu lumay J/Buug keyd Lam. 14241 kuna jirto lacag dhan sh.so. 169,226.91 kuna qoran magaca J/le Xaawo Maxamed Axmed sida ku cad warqadda lam. 2081 Tr. 14,11.87 iyo keydka Soomaalijyeed Laanta 3aad.

**HADDUU ARKAY:** Qod. 69 sharciga Lam. 2 ee Tr. 9.9.1962

**WUXUU XEERIYEY**

In ja baabi'iyo (Ammortamento) J/Buug keyd Lambar 14241 Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaalijyeed L/3aad kuna jirto lacag dhan sh.so. 169,226.91 kuna qoran magaca Jaalle Xaawo Maxamed Axmed.

**WAXAA LA AMRAYAA**

Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaalijyeed Laanta Saddexaad in ay siiso J/le Gaawo Maxamed Axmed lacagta caddeyntu tahay sh.so. 169.226.91 oo ah beddelkii J/Buug kor ku qoran markay ka soo wareegto muddo aan ka yareen 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa wax ishortaag ah aan laga keenin.

Muqdisho, 14.11.87.

**GARSOORAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR**  
Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashj

**MAXKAMADDA GOBOLKA TOGDHEER BURCO**

Uj: Baafin J/War. ee Lambar 0029138

MARKUU ARKAY: Dacwadda ku saabsan Baafinta J/War.  
ee lumay

MARKUU ARKAY: In uu lumay J/War. ee Lam. 0029138  
ee sh.so. 500,000

MARKUU ARKAY: Ogeysiinta Bankiga Ganacsiga & Key.  
Soomaaliyeed Laanta Burco.

MARKUU ARKAY: Qod. 69 sharciga lam. 2 ee 9.9.1965

**WUXUU XEERIYEY**

In la baabi'yo (Ammortamento) J/War. ee Lambarkiisu  
kor ku xusan yahay lagana sameeyay laanta Burco, kuna  
qoran J/le Cabdi Cawed Cali kuna jirtay xanbaarsanaa lac.  
ag dhan sh.so. 500,000 kana lumay Ismaaciil Cabdi Carab.

**WAXAA LA AMRAYAA**

Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed Laanta  
Burco in la siiyo J/le Ismaaciil Cabdi Carab lacagta dhan  
sh.so. 500,000 oo ah beddelkii J/War. ee lumay ee aan kor ku  
soo xusnay kadib markii ay ka sii wareegto muddo aan ka  
yareen 20 casho gudahood laga biyaabo maalinta go'aanka  
laga soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka  
horaysa aan la keenin wax is hortaag ah.

MGT. 3.11.87

Tr. 5.12.1987.

**GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA G/TOGDHEER BURCO**

Dr. Abokar Islaw Cumar

**MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR**

**HADDUU ARKAY:** Arjiga uu soo qortay J/le Faaduma Cali Mursal

**HADDUU TIXGELIYEY:** In uu lumay J/War. Lambar 0145660 kuna jirto lacag dhan sh.so. 24,000 kuna qoran magaca J/le Faaduma Cali Mursal sida ku cad warqad. da lam. 21031 Tr. 13.12.87 iyo keydka Soomaaliyeed L.Q.X.G.

**HADDUU ARKAY:** Qod. 69 sharciga lam. 2 ee Tr. 9,9,62

**WUXUU XEERIYEY**

In la baabi'yo (Ammortamento) J/War. Lam. 0145660 Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed L/Q/X/Guud kina jirto lacag dhan sh.so. 24,000 kuna qoran magaca J/le Faaduma Cali Mursal.

**WAXAA LA AMRAYAA**

Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed L/Garowe in ay siiso J/le Faaduma Cali Mursal lacagta caddeyntu ta hay sh.so. 24,000 oo ah beddelkii J/War. kor ku qoran markey ka soo wareegto muddo aan ka yareen 15 maa'mood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa wax is hortaag ah aan laga keenin.

Muqdisho, 15.12.87.

**GARSOORAAH MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR**

**Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi**